



لجنة إغاثة إفريقيا
AFRICAN RELIEF COMMITTEE
أثر .. يبقى

مسار خيرية

CHARITABLE PATHS

Warside bille ah oo ay soo saarto hay'adda Gargaarka Africa 'ARC'

(7PAGE) TUESDAY ,9 SEP 2022 Muharram 1444 Hargeisa-Somaliland



ARC Oo In Ka
Badan 4 Kun Oo
Qof Gaadhsiiisay
Gargaar Abaaraha

KA AKHRI
CADADKAN

- Madaxweynaha Puntland Oo Qaabiyah Wafti Ka Socda ARC
- Kulankii Lix Billoodlahaa Ahaa Ee Hawlwadeennada ARC Oo Qabsoomay
- Dhammaystirka 2 Ceel Oo Ay Ka Faa'idaysan Doonaan 100 Qoys
- Buudhiyo Lagu Caawiyey Qoysas Dhibaato Ka Soo Gaadhey Gubashadii Suuqa Waaheen
- Xarun Qur'aanka Lagu Xiftiyi Doono oo Xadhiga Laga Jaray
- ARC Oo Xadhiga Ka Jartay Masaajid Ay Ka Dhistaay Abaars
- Guddoomiyaha ARC Oo Socdaal Shaqo Ku Tegey Muqdisho Iyo Puntland

Madaxweynaha Puntland Oo Qabilay Wafti Ka Socda ARC




Madaxweynaha maamul-gobaleedka Puntland, mudane Siciid Cabdillaahi Deni ayaa qaabilay guddoomiyaha hay'adda Gargaarka Afrika – ARC, Dr. Cabdiraxmaan Mucallimi iyo masuuliyiin ka socota hay'adda oo wehelinyey oo uu ka mid yahay Mudane Muxamed Cabdalqaadir oo madax ka ah xafiiska ARC ee Garoowe, Mudane Ciid Kaamil oo madax ka ah hawlah Barbaarinta ee xarunta waxbarashada AL-AMAL ee magaalada Garoowé, iyo agaasima-ha waaxda warbaahinta ee hay'adda mudane Cabdullah Almuqaddim. Waftiga hay'adda iyo madaxweyne Deni oo ay kulanka ku wehelinyeyen wasiirka qorshaynta, wasiirka arri-maha bani'aadamnimada iyo Maarataynta masiibooyinka, wasiir ku xigeenka wasiirka garsoorka, iyo tiro ka mid ah masuuliyiinta dawladda Puntland, waxa ay ka wada hadleen hababka ay hay'adda iyo dawladdu isaga kaashan karaan hawlah sama-fal ee ay ARC ka waddo deegaannada Puntland. Wasiirka hawlah bani'aadamni-mada iyo Maarataynta masiibooyinka

aya isaguna si gaar ah wafriga ugala hadlay hababka labada dhinac isaga kaashan karaan gurmadka degdeggaa ah ee la siinayo dadka abaaruhu dhibaateeyeen. Waxa aanay isku waafafeen in hay'addu ay raashin iyo 20 booyadood oo biyo ah gaadhsiiso 300 oo qoys.

Dr. Mucallimi ayaa isaguna dhan-kiisa ka mahadnaqay soo dhoweynta iyo niyadwanaagga uu waftigiisu kala kulmay madaxweyne Siciid Cabdillaahi Deni iyo xukuumaddiisa. Waxa aanu faahfaahin ka bixiyey mashaariicda ay hay'addu ka waddo Puntland oo uu ka mid yahay adeegga waxbarashada iyo Barbaarinta ee ay bixiso xarunta waxbarashada Al-Amal ee Garowe ay

hay'addu ka hirgelisay, xarunta caafimaadka ee 'Haya' oo dabayaaqadii 2021 ka ay hay'addu ka hirgelisay Garoowe, iyo guud ahaan barnaami-jada gargaarka degdeggaa ah ee ay hay'addu u fidiso dadka saboolka ah. Ugu dambayna waxa uu madaxweynaha uga mahadnaqay waqtiga uu siiyey kulankan, iyo falanqaynta muhiimka ah ee uu kala yeeshay hawla-ha ay waddo.



Wasaaradda Waxbarashada Somaliland Oo Shahaado Sharaf Guudoonsiisay ARC

Wasaaradda waxbarashada iyo sayniska Somaliland ayaa shahaado sharaf ku maamuustay hay'adda Gargaarka Afrika – ARC, taas oo ay ku bogaadinayso kaalinta ay kaga jirto adeegyada waxbarashada ee Somaliland oo ay ka hirgelisay xarumaha waxbarasho ee Hargeysa, Boorama, Laascaanood iyo Burco. Sida oo kalana gacan ka geysato mashaariicda dhismaha xarumaha waxbarashada.

Wasiirka waxbarashada mudane Axmed Maxamed Diiriye ayaa shahaadada guudoonsiyyey Dr. Cabdiraxmaan Mucallimi guddoomiyaha ARC oo hay'addiisa u guddoomay.





Dhammaystirka 2 Ceel Oo Ay Ka Faa'idaysan Doonaan 100 Qoys

Hay'adda Gargaarka Afrika – ARC ayaa dhammaystirtay laba ceel biyood oo ay ka hirgelisay tuulayaasha Iftin iyo Balli Kaliil ee gobalka Maroodijeex, Somaliland. Labadan ceel oo loogu magacdaray Marxuum Basaam Cabdaljabbaar Al-dawhaan iyo Marxuum Cabdullah Cali Al-Ciwadi, waxaa loo dhammaystiray dhismaha dusha sare oo sabbad ah, qalabka biyaha soo tuuraya oo gacanta lagu isticmaalayo, iyo darka Xoolaha laga waraabiinayo. Waxaa aanay dabooli doonaan baahida biyood ee in ka badan 100 qoys oo ka mid ah deegaanka tuuleyaashan.

Qodaalka ceelashan ayaa qayb ka ah mashaariicda biyaha ee ay hay'adda Gargaarka Afrika – ARC ka waddo magaaloojin iyo deegaanno tiro badan oo ka mid ah dhulka Somaliland iyo Soomaaliya. Kuwaas oo ay ujeeddadeedu tahay in dadka saboolka ah laga caawiyo helitaanka biyo la cabbi karo, iyo in la xakameeyo khatarta biyo yaraanta ee xilliyada jilaalka.

Kaariyooneyaal Lagu Caawiyey Qoysas Dhibaato Ka Soo Gaadhey Gubashadii Suuqa Waaheen

Hay'adda Gargaarka Afrika -ARC ayaa Kaariyooneyaal oo wax lagu dul iibinayo siisay afar ka mid ah muwaadiniintii dhibaatadu ka soo gaadhey gubashadii xanuunka badnayd ee suuqa WAAHEEN ee magaalada Hargeysa, horraantii bishii soon ee 2022 ka.

ARC oo ka shaqaysa hawlaho gargaarka ayaa Kaariyooneyaashan bixisay kaddib daraasad ay ku samaysay xaaladda runta ah ee qoysaskan iyo illaa xadka baahidoodu ay gaadhsisan tahay. Waxaa Kaariyooneyaashan loo raaciyeey badeecado kala duwan oo ah raasamaalkii ay shaqada ku bilaabi lahaayeen ah.

Tallaabandan ayaa qayb ka ah mashaariicda 'Xoogsi Xalaal ah' ee ay hay'adda ARC fuliso oo ay ujeeddadoodu tahay kobcinta dhaqaala si dadka saboolka ah looga caawiyo in ay ka baxaan xaaladda baahida, una gudbaan marxalad ay iyagu waxsoosaaraan. Wuxuu aanu ka mid yahay Barnaamijka horumarka Waara ee ay maalgelintiisa iyo kormeekiisaba leedahay hay'adda Caalamiga ah ee ALRAXMA oo xarunteedu ay tahay dalka Kuweyt.



ARC Oo In Ka Badan 4 Kun Oo Qof GaadhsiiSay Gargaarka Abaaraha




Hay'adda Gargaarka Afrika – ARC oo sii wada ololihii gargaarka degdegga ah ay ku gaadhsiinaysay dadka ay abaaruhu dhibaateeyeen ee deegaannada Somaliland iyo Soomaaliya, aaya fulisay obole cusub oo ay caawimooyin kala duwan ku gaadhsiisay

deegaannada Muqdisho iyo Puntland ee Soomaaliya.

Mashruucan oo ay maalgelintiisa iyo korameeriisaba leedahay hay'adda Caalamiga ah ee ALRAXMA ee xarunteedu tahay dalka Kuweyt, waxaa ka mid ahaa 700 oo qoys oo la gaadhsiiyey raashin isugu jira, bariis, daqiq, sonkor, saliid iyo timir. Sida oo kale, 20

booyadood oo biyo la cabbi karo ah ayaa ay hay'addu u qaybisay qoysaska looga faa'iideeyey mashruucan oo tirada xubnaha ay ka kooban yihiin lagu qiyasayo illaa 4 kun oo qof.



ARC Oo Xadhiga Ka Jartay Masaajid Ay Ka Dhistay Abaарso

Hay'adda Gargaarka Afrika – ARC ayaa xadhiga ka jartay Masaajid cusub oo ay ka dhistay magaalada Abaарso ee gobalka Maroodijeex, Somaliland. Dhismaha masaajidkan oo loogu magac daray Marxuum Fahiid Saalim Qaddaam Al-Cajmi, waxa uu ku fadhiya dhul cabbirkiisu dhan yahay 75 Mitir oo laba jibbaaran, iyada oo ay halkii mar ku tukaan karaan dad ka badan 120 qof. Wuxaana ku lammaanaa agabka iyo kaabayaasha aasaasiga ah, sida

qaybta waysada oo leh qasabado, gogosha oo loo dhammaystiray iyo cod-baahiyeasha. Dhismaha masaajidkani waxa uu qayb ka yahay mashaariicda dhismeyaasha xarumaha bulshada ee ay hay'addu ka fuliso deegaannada Soomaalida ee gobalka Geeska Afrika, waxaana maalgelisay hay'adda Caalamiga ah ee ALRAXMA oo dalka Kuweyt laga leeyahay.



Xarun Qur'aanka Lagu Xiftiyi doono Oo Xadhiga Laga Jaray

Hay'adda Gargaarka Afrika – ARC ayaa xadhiga ka jartay dhismaha xarun lagu xiftiyi doono Qur'aanka Kariimka ah oo ay ka hirgelisay xaafadda New Hargeysa ee magaalada Hargeysa. Xarunta 'Bil-Qur'aan Naxfad-hum – 2' oo ah tii labaad ee ay hay'addu dhisto waxa ay ka kooban tahay laba Fasal oo qalabkoodu u dhammaystiran yahay, isla markaana lagu diyaariyey Kutubtii Qur'aanka Kariimka ahaa iyo kaabayaasha kale ee muhiimka ah.

Munaasabadda xadhig ka jarista xarunta waxaa ka qaybgalay isuduwaha mashaariicda dhismaha ee hay-adda ARC mudane Daa'uud Axmed, madaxa hawlah Barbaarinta ee xarunta waxbarashada ee Kuweytiga oo hoostagta hay'adda ARC, mudane Axmed Cabdalxamiid iyo tiro ka mid ah shakhsiyadka bulshada magaca ku dhex leh. Xaruntan oo ku fadhiba bed cabbirkiiisu dhan yahay 50 Mitir oo laba jibbaaran ayaa ka qaybqaadan doonta Barbaarinta iyo diyaarinta ardayda wiilashada iyo gabadhaha ah oo xiftiga Qur'aanka ka sokoow, la bari doono waxbarashada aasaasiga ah ee kabaysa waxbarashadooda dugsiyada ee tooska ah.

Waxaa xusid mudan in bishii Feebarweri ee isla sannadkan xadhiga laga jaray qaybta koowaad ee xaruntan 'Bil-Qur'aani naxfad-hum – 1' oo ay hay'addu ka hirgelisay magaalada Burco. Dhismaha xarumahan ayaa qayb ka ah mashaariicda dhisme oo ay fulisay hay'adda ARC iyada oo kaashanaysa hay'adda Caalamiga ah ee ALRAXMA Kuweyt.



Guddoomiyaha ARC Oo Socdaal Shaqo Ku Tegey Muqdisho Iyo Puntland



Guddoomiyaha hay'adda Gargaarka Afrika – ARC, Dr. Cabdiraxmaan Al-mucallimi ayaa booqasho shaqo ku tegey xafiisyada ay hay'addu ku leedahay magaalooinka Muqdisho iyo Garoowe ee Soomaaliya. Muddadii uu socdaalka ku guda jiray waxa uu soo maray dhammaan qaybaha iyo faracyada xafiisyada ARC, waxa aanu kulamo shaqo iyo is xogwaraysi ah la yeeshay masuuliyyinta iyo halwadeennada kala duwan ee xarumahaas oo uga warbixiyey habسامي u socodka mashaariicda waxbarashada, dhismaha iyo samafalka arrimaha

bulshada ee ka socda deegaannadaas. Dhinaca kalana Dr. Mucallimi waxa uu masuuliyyinta xafiisyadan la gorfeeyey qorsheyaasha horumarineed iyo tayada adeegyada ay qabtaan iyo sida oo kale kaalinta ay ku leeyihii gargaarka bulshada.

Guddoomiyaha waxaa socdaalkan ku wehelinayey agaasimaha waaxda warbaahinta ee ARC mudane, Cabdullah Almuqaddim oo isaguna kulamo is xogwaraysi iyo tilmaamid ah la qaataw wakiillada warbaahinta ee xafiisyada Muqdisho iyo Garoowe, Isaga oo dhina-

ca kalana siiyey tababarro la xidhiidha sawirqaadista iyo habka ugu habboon ee looga warbixin karoo hawlahaa iyo mu-naasabada ka dhaca deegaannada ay ka hawlgalan.

Mudane Muqaddim masuuliyyinta uu kulamada la yeeshay waxa uu ku baraa-rujiyey muhiimadda togan ee ay warbaahinta xidhiidhka bulshada u leedahay wanaajinta xidhiidhka ay hay'addu la leedahay dadweynaha iyo gudashada waajibaadkeeda.



Kulankii Lix Biloodlaha Ahaa Hawlwadeennada ARC Oo Qabsoomay



Shaqaale tiradoodu gaadhayso 300 oo ka mid ah masuuliyiinta iyo hawladeennada laamaha iyo mashaariicda kala duwan ee hay'adda gargaarka Afrika – ARC, ayaa 18 kii August isugu yimid kulanka lix biloodlaha ah oo kalkan uu hal-ku-dheggiisu ahaa 'Quruxda guusha iyo raad wanaaggeeda'. Munaasabaddan oo lagu soo bandhigay waxqabadka iyo guulaha hay'adda ee nuskii hore ee sannadka 2022, waxaa ujeedooyinkeeda kale ka mid ahaa isdhexgalka, waayo-aragnimo isdhafsiga, adkaynta xidhiidhka shaqaalaha dheddoda, iyo sida oo kale in shaqaalaha la siiyo fursad ay ku soo bandhigaan guulaha ay ka soo hooyeen xilalkooda kala duwan, laguna dhiirrigeliyo in ay sii laban-laabaan dadaalka.

Mudane Ciid Cadalladiif, agaasimaha waaxda waxbarashada iyo Barbaarinta ee ARC oo furitaankii kulanka ka hadlay ayaa sharraxay muhiimadda ay kulamada noocan ahi leeyihin, taas oo ay ka mid tahay kobcinta iyo adkaynta

xidhiidhka walaalnimo iyo iskaashi ee hawladeennada hay'adda, iyo sida oo kale in ay tahay jawi ka baxsan shaqadid joogtada ahayd oo abuuraya ruux cu-sub iyo dardar hor leh oo waxsoosaarka kordhisa.

Sheekh Yaxya Alcaqili, agaasimaha golaha fulinta ee hay'adda Caalamiga ah ee ALRXAMA oo isaguna kulanka hadalka jeediyey ayaa ka warramay muhiimadda war-isgaadhsinta iyo iskaashigu u leeyahay xoojinta shaqo wadareeedda iyo raadka togan ee ay ku leedahay shaqaalaha qaybaha iyo waaxyaha kala duwan ee hay'adda. Sheekh Yaxye waxa uu shaqaalaha kula dardaarmay in ay ka dheeraadaan dhaqanka ah gooni u shaqaynta oo ay ku dadaalaan iskaashiga iyo shaqo wadareeedda, si looga midho dhaliyo himilooyinka hay'adda Gargaarka Afrika – ARC oo ah wakiilkha hay'adda ALRAXMA u qaabilsan deegaannada Soomaalida ee Geeska Afrika. Waxaa isaguna munaasabadda ereyo kooban ka jeediyey Mudane Qaanim

Shaaheen oo ka hadlay faa'idooyinka ay kulamada noocoan ahi u leeyihin shaqada samafalka, iyo kaalinta hindiseyaasha hawladeennadu keenaan ay ka qaadan karaan tayeynta, suuqgeynta iyo wanaajinta hawlaha samafalka ee ay hay'adda ARC u hayso bulshada.

Guddoomiyaha guud ee hay'adda Dr. Cabdiraxmaan Mucallimi oo gebagebadii kulanka hadallo dhiirrigelin, waano iyo bogaadin isugu jira ka jeediyey kulanka ayaa hawladeennada ku dhiirrigeliyey in ay sii labanlaabaan dadaalka iyo in ay joogteeyaan shaqada iskaashiga ku dhisan ee looga bartay. Isaga oo dhinaca kalana bogaadiyey guulaha ay hay'addu gaadhaday sannadkan qaybtisa hore, rajeeyeyna in qaybta hadhayna ay noqoto mid ay hay'addu guulo ka soo hoysay guud ahaanba hawlaha ay ka waddo deegaannada Somaliland. Waxa kale oo munaasabadda ka mid ah barnaamijyo maawelo ah iyo bandhigo ay qaybta cududda shaqaalaha ee ARC ku dhiirrigelinaysay shaqaalaha.



siiyey casharro la xidhiidha xirfadda iyo hannaanka casriga ah ee sugidda ammaanka iyo ilalainta heerka sarraysa ee badqabka xarumaha iyo hantida hay'adaha samafalka.

Tababar la siiyey hawladeennada amniga iyo badqabka ee ARC

Hay'adda Gargaarka Afrika – ARC ayaa tababar dhinaca sugidda ammaanka ah siisay hawladeennada ammaanka ee xarumaheeda ka hawlala.

Tababarkan oo ay soo agaasimeen waaxyaha adeegyada maamulka iyo shaqaalaha ee hay'addu, waxaa bixinayey mudane Siciid Maxamed Ismaaciil oo ku xeeldheer arrimaha ammaanka. Waxa aanay ujeedadiisu ahayd tayeynta iyo horumarinta nidaamka amni ee xarumaha kala duwan ee ARC, si loo xoojiyo nabadjelyada iyo badbaadada hawladeennada iyo hantida hay'adda.

Tababartayaasha oo ay tiradoodu 31 ahayd waxaa la



لجنة أفريقيا للإغاثة
AFRICAN RELIEF COMMITTEE
أثر .. يبقى

[@africanreliefco](#)

مسارات
خيرية CHARITABLE PATHS